

Guudmarka Deeqaha ku Saleeysan Baahida ee Early Achievers

Deeqaha ku saleeysan baahida waxay diyaar u yihiin inay ka caawiyaan ka qaybgalayaasha Early Achievers si ay ugu soo iibsadaan horumarinta manhajka iyo qalabka waxbarashada, alaabta iyo qalabka lagu hagaajinayo tayada barnaamijka, si ay u gaaraan qiimeynta Heerka 3 ama wax ka sarreeya.

Bixiyeyaasha daryeelka carruurta ee ka qeybgalaya Early Achievers waxay xaq u yeelan karaan inay helaan Deeqda Baahida Ku-saleysan oo hal mar ah oo qiimaha soo socota:

- Illaa iyo \$750 Daryeelka Guriga Carruurta Qoyska
- Illaa iyo 1,000 Xarumaha Daryeelka Carruurta

Qaabka Qiimaynta U-qalmidda

Dhammaan ka qeybqaatayaasha Early Achievers waxay xaq u leeyihiin deeq hal mar ah. Si ay ugu qalmaan, ka qaybgalayaasha Early Achievers waa inay soo buuxiyaan qaabkaan soo socda:

- Ka diiwaangashan yahay Early Achievers, ka qaybgelayo Heerka 2, ama
- Ka diiwaangashan yahay Early Achievers, ka qaybgelayo Heerka 2

IYO la kulmo ugu yaraan mid ka mid ah kuwa soo socda:

- Ka diiwaangashan tahay barnaamijka cuntada Heerka 1, ama
- Uu ku nool yahay degmo dugsiyeed kaasi oo u adeega carruur dakhligoodu ka hooseeyo 20% kuna salaysan xogta OSPI (macluumaad badan oo ah sida go'aan looga gaadho haddii degmo dugsiyeedku uu la kulmo qaabkan, fadlan ka eeg Su'aalaha Badanaaba La Isweydiyo ee qeybta hoose)

Mudnaysiinta

Waxda Waxbarashada Hore (Department of Early Learning, DEL) waxaa laga yaaba inay mudnaanta siiso codsiyada ka qaybgalayaasha kuwaas oo bixiya adeegyada carruurta da'da aan dugsi gaarin ee helaya Kaalmada Daryeelka Carruurta ee Xiriirinta Shaqaynta (Working Connections Child Care, WCCC) iyadoo qiyaasaya boqolkiiba inta carruurta hessa adeegyada xarunta ama daryeelka carruurta ee guriga qoyska, iyo kuwa muujiyay barnaamijyo dhaqanada kala duwan.

Deeqaha Kusalaysan Baahida waxa laga soo iibsanaa karaa ashyaada noocyadaan soo socda ah:

- Qalabka lagu hagaajinayo Qiyaasta Qiimaynta Bey'adda (Environment Rating Scale, ERS) ama Habka Darajeeynta Eegitaanka Fasalka (Classroom Assessment Scoring System, CLASS)
- Horumarinta manhajka iyo qalabka waxbarashada
- Wakhtiga beddelka
- Tababarka & iyo Kobaca Xirfadeed
- Sahayda kale ama qalabka lagu hagaajinayo tayada barnaamijka, sida loogu ansixiyey codsi qorshaha kharashgaraynta

Qarashkaas looma isticmaali karo in lagu hagaajiyo miisaaniyada, kaararka deeqda, kordhinta mushaarada, nooc kasta oo abaalmarina, ama adeegyada diineed. Macluumaad badan oo ku saabsan

kharashaadka aan la ogolayn, fadlan tixraac Hagayaasha Hawlaha Early Achievers, Qaybta 8: Taageerada Qiimeynta Hore iyo Dhiirigelinta.

Howsha Codsiga

1. Codsadayaashu waa inay soo buuxiyaan dhammaan waraaqaha codsiga: foomka Codsiga Deeqda Ku Saleeysan Baahida, foomka W-9 iyo foomka Bixinta Qandaraaslayaasha Washington oo dhan. *Waraaqaha codsiga aan dhammaystirneyn lama aqbalayo, sidaa daraadeed fadlan hubi in aysan jirin meelo bannaan oo aan la soo buuxin ama aan dhameystirnayn.* Foomamka waxaa laga heli karaa bogga internetka DEL ee <https://del.wa.gov/EarlyAchievers-PreRatingToolkit>.
2. Waraaqaha codsiga oo dhammaystiran boostada ayaa lagu soo diri kartaa ama fakis ayaa loogu diri karaa DEL. *Codsiyada elektarooniga lagu soo diro (emaylka) lama aqbali doono, sababo macluumaadka qarsoodiga ah ee lagu soo aruuriyo waraaqaha codsiga daraadooda.*

CODSIGA BOOSTADA

Department of Early Learning
Attn: Early Achievers Needs-Based Grants
PO Box 40970
Olympia, WA 98504-0970

FAKISKA

(360) 725-4417

Su'aalaha Badanaa La Is-weydiyo

Sidee ka qaybgaluhu ku ogaan karaa haddii uu u-qalmo dugsii degmeedka?

U-qalmidda degmo dugsiiyeedka waxa ku jira kuwa ay ugu yaraan 20% ardayda ay helaan cuntada bilaashka ah ama laga yareeyay qiimaha. Si loo go'aamiyo haddii dugsiga degmada uu xaq u leeyahay, booqo Warbixinta Dugsiyada Dadweynaha Washington ee Xogta U-qalmitaanka Aagga ee Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha (Office of Superintendent of Public Instruction) ee ku taal bogga: <http://k12.wa.us/ChildNutrition/pubdocs/2016-17WaPublicSchoolDataAreaEligibility.pdf>.

Ka qaybgaluhu ma soo dalban karaa Deeqda Baahiyaha ku Saleysan, xitaa haddii uusan la shaqeeyn wakiilka Child Care Aware of Washington?

Haa, ka qaybgaluhu waxa uu soo diri karaa waraaqaha codsiga oo la buuxiyay.

Xarumaha ECEAP Early Achievers ee haya dariiqa shatiga ma soo codsan karaan deeqda?

Haa.

Ka qaybgaluhu ma soo dalban karaa Deeqda Baahiyaha ku Saleeysan, xataa haddii uusan u adeegin carruurta hesha Kabitaanka Daryeelka Carruurta ee Xiriirinta Shaqada (Working Connections Child Care, WCCC)?

Haa.

Deeqda ma loo isticmaali kara in lacag loogu celiyo kaqaybgalaha qalab uu horay u soo iibsaday?

Maya, miisaaniyadan waxa kaliya oo loo isticmaali karaa khayraadka lagu sheegay Qorshaha Deeqaha Kusalaysan Baahida markii deeqda la ogolaado.

Kaqaybgaluhu ma codsan kara qiime ka badan inta la ogol yahay?

Maya, \$750 waa qiimaha ugu badan ee ka qaybgalayaasha daryeelka carruurta guriga qoyska iyo \$1,000 oo ah qiimaha ugu sarreeya ee ka qaybgalayaasha xarumaha daryeelka carruurta iyo kuwa tubta shatiga ECEAP. Deeqda looma isticmaali karo qiime ka badan qiimaha u sarreeya ee deeqda.

Ma lagu qiimeyn karaa xaruntu inay hesho abaalmarinta deeqda?

Haa, hasa ahaatee, goobaha lagu qiimeeyo Heerka 2 oo kaliya ayaa u-qalma.

Bixiyuhu ma laga doonayaa inuu meel ku hayo rasiidyada?

Haa. Sida ku qeexan xeerarka iyo shuruudaha codsiga Deeqda Baahida ku saleysan, xarunta qaataha waa inay hayaan dhammaan risiidhada ay diiwaangeliso sida gadashada la xiriira lacagaha deeqda ah 7 sano, oo Ogolaaday in ay siiyaan rasiid iyo waraaqo Waaxda Waxbarashada Hore ee dhan alaabta la soo iibiyay ee la xiriirta deeqdan, marka laga codsado. Ku guuldareysiga fulinta shuruudahaan waxay keeni doontaa in xarunta ay dib ugu celiso qeyb, ama dhammaan, deeqda DEL.

Maxaa loogu baahan yahay in la soo buuxiyo iyo diro Foomanka Hayadda Bixiyaha Gobolka oo dhan iyo W-9?

Deeqaha Baahiyaha ku Salaysan waxaa si toos looga siiya milkiilaha gobolka. Gobolka Washington waxa uu ka doonayaa qof walba oo lacag bixin ka helaya inuu isku diiwaangeliyo hayad bixiye ahaan.

Waa sidee haddii aan horay u lahaa lambarka Hayada Bixiyaha ee Gobolka oo dhan?

Haddii aad u malaynayso inaad leedahay lambarka Hayada Bixiyaha Gobolka, fadlan hubso inaad ku soo qorto foomka codsiga aad soo dirayso ee qaybta la ah waraaqaha codsiga. Haddii aadan hubin inaad leedahay lambar, waxaad ka eegi karta xogta online ka ah: <http://www.des.wa.gov/services/ContractingPurchasing/Business/VendorPay/Pages/VL.aspx>. Haddii aadan lahayn lambar, mid ayaa lagu siin kara adigoo soo buuxinaya iyo soo diraya foomka Hayadda Bixiyaha Gobolka oo dhan/foomka W-9.

Waxaan buuxiyey warqadahayga libiyaha Gobolka oo Dhan, waa maxay sababta aanan weli u helin lambar?

Sababtoo ah nooca xogta xasaasiga ah ee foomamkan, xoqitaanka, marinta qada cad ama nooc kasta oo wax ka bedelida ah ee foomamka lagu sameeyey ayaa kahor istaagi doona in wax laga qabto. Fadlan hubi in foomamku si buuxda oo sax ah u buuxsan yihiin, iyada oo aan wax laga bedelin ama qad cad aan la marin. Haddii aadan ku helin Lambarka libiyaha Gobolka oo Dhan ama wixii macluumaad ah 10 cisho oo maalmaha shaqada kadib markii aad soo gudbisid waraaqahaaga libiyaha Gobolka oo Dhan, la xiriir del.fiscal@del.wa.gov.

Ka qeybgaluhu ma heli karaa Deeqda Ku saleysan Baahida wax hal mar ka badan?

Haa. Ka qaybgalayaasha lagu qiimeeyay Heerka 2 ama ka qaybgalaya Heerka 2 xaq ayay u leeyihiin inay soo codsadaan Deeqda Baahiyaha ku Saleysan ee hore hal mar. Haddii ka qaybgale lagu qiimeeyo Heerka 2 kadib markii ay heleen abaalmarinta deeqda hore, waxay uu xaq u leeyahay inuu soo codsato deeq labaad si uu helo gargaarka dadaalka gaaritaanka qiimeynta Heerka 3.

Maxuu ka qaybgalahu filan karaa, kadib markii waraaqaha codsiga Deeqda Baahiyaha ku Saleysan la gudbiyo?

Markii la helo foomamka codsiga Deeqda Baahiyaha ku Saleeysan, Waaxda Waxbarashada Hore waxay qabata hubin tayo leh si loo xaqiijiyo in foomamka dhammaantood la soo wada buuxiyay. Ogaysiinta ah in la helay ayaa markaas loo diraya kaqaybgalaha. Haddii foomamku aanay wada dhammaystirnayn, kaqaybgalaha ayaa loo sheegi doona tilmaamaha dib-u-soo gudbintay.

Foomamka dhammaystiran waxaa loo gudbin doona ansixin iyo lacag bixin. Guud ahaan howshaasi waxay qaadataa 4-6 toddobaad. Haddii ay jiraan arrimo ku saabsan Aqoonsiga Iibiyaha Gobolka ama waraaqaha maaliyadeed ee kale, kaqaybgalaha ayaa lala xiriiray inta lagu jiro waqtiga sidoo kale.

Marka foomamka loo gudbiyo lacag bixinta, ogeysiin kale oo dheeraad ah ayaa loo diraya kaqaybgalaha. Ogeysiisyada caadi ahaan waxaa lagu soo diraya email (marka ay suurto gal tahay).

Yaan la xiriiri karaa haddii aan qabo su'aalo ku saabsan uqalmitaanka ama kharashgaraynta?

Kaqaybgalayaashu waxay iimayl ugu soo diri karaan DEL Needs.Based.Grants@del.wa.gov.